

## HESHIISHA WAALIDKA & DUGSIGA HOOSE EE MCGAVOCK 2017-2018

*Dugsiga Hoose ee McGavock iyo waalidiinta ardayda ka qaybgelaya hawlaha, adeegyada iyo barnaamijyada lagu maalgeliyo Title I. Qaybta A Xeerka Arday Walba Guulaysta (ESSA) waxay isku raaceen in heshiiskani lagu xusay sida waalidiinta, dhammaan hawladeenada iskuulka, iyo ardaydu u wadaagi doonaan masuuliyada loogu talagalay in kor loogu qaado horumarka waxbarasho ee ardayga sidoo kale dariiqa uu iskuulku iyo waalidiintu u dhisi doonaan oo diyaarin doonaan iskaashi caruurta ka caawin doona inay gaaraan heerarka sare ee gobalku u dejiyey.*

### Hadaan ka mid ahay Macallimiinta iyo Hawladeenada Dugsiga Hoose ee McGavock waxaan:

- ❖ Bixin doonaa manhaj tayo sare leh iyo waxbarasho lagu xoojinayo sidoo kale bey'ad waxbarasho wax ku ool ah taasoo daah-furta in caruurta ka qaybgelaysaa gaaraan oo kor u dhaafaan maadooyinka oo idil heerarka waxbarasho ee ay gaaraan ardayda ku nool Tennessee. Tusaalayaasha Barnaamijyada iyo Xilalka:
  - Macallin Takhasusu u leh Horumarinta Akhriska/Qoraalka
  - Macallin Takhasusu u leh Waxbarashada
  - Macallin Takhasusu u leh Waxbarashada Sare
  - Barnaamijka Simnaarada Macallimiinta
  - Barnaamijka Caawimada Waxbarashada (RTII) Akhriska, Xisaabta iyo/ama Taakulada Luqada
  - Macallimiin Galabtii Iskuulka ku Caawiya
  - Barashada Shucuurta iyo la Dhaqanka Bulshada (SEL)
  - Barnaamij isu dheelitiran Akhris/Qoraal iyo Xisaab
  - Manhajka Guud Gobalka Tennessee
  - Siminaarada Waxbarashada Qowmiyadaha
- ❖ Qabashada shirarka sanadlaha ee waalidka-macallimiinta iyo haddii loo baahdo kaasoo heshiiskan lagu lafaguri doono maadaama uu cilaacaad la leeyahay guusha ardaygu gaar u gaaro.
  - Dayrta 2017: 1da Nofembar, 2017
- ❖ Waalidiinta si joogta ah loo siiyo warbixin ku saabsan horumarka ilmahooda. Gaar ahaan iskuulku wuxuu bixin doonaa warbixinta horumarka, report cards, warbixinta Caawimada Waxbarashada, iyo xogta guddoonka waxbarashadu qiimeeyey.
  - Progress Reports waxaa la soo diraa: 6da Sibtembar, 2017, 15ka Nofembar, 2017, 7da Febraayo, 2018, 25ka Abril, 2018
  - Report Card-ka waxaa la soo diraa: 23ka Oktobar, 2017, 9ka Janaayo, 2018, 26ka Maarso, 2018, 24ka Maajo, 2018
- ❖ Waalidiinta la siiyo ilaa xad fursad ay kula kulmaan shaqaalaha. Gaar ahaan shaqaaluhu waxaa loo heli doonaa si loola tashado, hadii la soo waco, ama waxay la kulmi karaan waalidiinta xiliga shirka la codsaday iyo xiisadaha macallimiintu diyaargarowga ku jiraan.
  - Shirarka la codsaday, aroortii intaa xiisadaha la bilaabin, galabtii, iyo xiliyada macallimiintu diyaargarowga ku jiraan.
  - Kulamada Waxbarashada Khaaska ah (IEP)
  - Kulamada Kooxda Taakulada (Dardargelinta Nidaamka)
  - La xiraaraan qofka iyagoo u diraya telefeon, fariin qoraala, email, wargeyska fasalka, ajandayaasha joogtada ah ama faylasha isgaarsiinta
  - Xafladaha Laxiriira Iskuulka: Tababarada Waalidiinta, Kulmada PTO, iyo Xafladaha Bulshada
- ❖ Waalidiintu waxay ka helaan fursad ay ku tabarucaan sidoo kale kaga qaybgalaan waxbarashada ilmahooda.
  - Macallin khaasa
  - Tabarucaha Fasalka
  - Tabarucaha Iskuulka (Maktabada, Hoolka Cuntada, iwm.)
  - Safarada Kooban (field trips)
  - Maalinta Ciyaaraha
  - Baadhitaanada Caafimaadka
  - Tababarada Waalidka
  - Kulamada Bulshadu La yeelato Maamulaha
  - Kulamada PTO
  - Boy/Girl Scouts
  - Guddida Qorshaynta Horumarinta Iskuulka

### Hadaan ahay Waalidiinta/Masuuliyiinta McGavock waxaan:

- ❖ Isha ku hayn in ilmahaygu si joogta iskuulka u dhigto sidoo kalena waqtiga dhowro. (8:00 am-3:00pm)

- ❖ La xiriiri doonaa macallinka ilmahayga sidoo kale waxaan ka qayb geli doonaa shirarka, dib u eegi doonaa warbixinta horumarka ardayga, ka soo jawaabi doonaa telefoonada/email-lada, sidoo kae waxaan u kuurgeli doonaa ajendeyaasha joogtada ah ama fooldarka isgaarsiinta.
- ❖ Diyaarin doonaa guri jawigiisu dhiirigelinayo in ilmahaygu wax barto.
- ❖ Taakulayn doonaa sidoo kalena u hoggaansamo doonaa shuruucda gudoonka iyo iskuulka.
- ❖ Si joogta ah maalin walba ugala hadli doonaa ilmahayga casharada iyo hawlaha uu qabtay intii joogay iskuulka.
- ❖ Si toosa uga luq lahaan doonaa waxbarashada ilmahayga. Tusaaleyaasha qaababka loogu taxaluqo: Xubin ka noqdo PTP, tabarucida iskuulka/fasalka, waalidku ku lug lahaado Guddida Horumarinta Iskuulka, ama Guddida Tashiga Waalidka gudoonka.

### **Hadaan ahay Ardayda McGavock waxaan:**

- ❖ Rumaysanahay inaan awoodo inaan wax baran doono.
- ❖ Raaci doonaa nidaamka iskuulka oo idil.
- ❖ U hoggaansami doonaa shuruucda anshaxa iyo lebiska iskuulka gudoonka waxbarashada.
- ❖ Ixtiraami doonaa nafsadayda, saaxiibaday iyo dadka waaweyn oo idil.
- ❖ Qaadi doonaa masuuliyada inaan daryeelo ajandahayga, hawlaha iskuulka iyo buugta.
- ❖ Iskuulka imanayaa anigoo diyaar u ah oo agabka waxbarashada ee loo baahnaa ii idil yahay.
- ❖ Kala hadli doonaa hawlaha iskuulka iyo casharada waalidiintayda maalin walba sidoo kale in ajandahayga ama faylka isgaarsiinta maalin walba la soo saxeeexo.

### **Heshiiska Is Afgarashada Waalidiinta- Dugsiga Hoose ee McGavock waxaa dheer :**

1. Dugsigu wuxuu si joogto ah waqtiga loo talagalay u hawlgelin doonaa waalidiinta xiliga qorshaynta, horumarinta shuruucda iskaashiga waalidiinta iskuulka, abaabulka.
2. In waalidiintu si joogto ah waqtiga loogu talagalay ka qaybqaataan qorshaha barnaamij kasta oo si wadajir ah iskuulka oo idil lagu hormarinayo.
3. In laqabto kulamada sanadlaha ah si loo wargeliyo waalidiinta in iskuulku ka qaybgelayo Title I, barnaamijyada Qaybta A; inay sharaxaan Title I, shuruudaha Qaybta A; iyo xuquuda waalidiinta ka qaybqaatey Title I, barnaamijkyada Qaybta A. Iskuulku wuxuu qabanqaabin doonaa kulanka waqtiga ugu haboon waalidiinta, sidoo kale waxay bixin doonaan xiliyo kaladuwan kulamo kale oo loogu talagalay iskaashiga waalidiinta sida aroortii iyo fiidkii. Arintani waxay sahashaa in waalidiin badan ilaa xad awoodaan inay ka soo qaybgalaan. Iskuulku wuxuu casuumi doonaa waalidiinta ubadkoodu ka qaybgelayo Title I barnaamijyada Qaybta A oo idil, waxayna ku dhiirigelin doonaa inay ka soo qaybgalaan.
4. Waalidiinta ubadkoodu ka qaybgelayo waxaa la siin doonaa macluumaad la fahmi karo oo isku mid ah, waxaa ku jira qaab kale haddii ay waalidiinta ubadkoodu kala dhantaalan yahay ay codsadaan, sidoo kale haddii ay suurto gal tahay luqad ay waalidiintu fahmi karaan.
5. Waalidiinta ubadkoodu ka qaybgelayo waxaa la siin doonaa waqtiga ku haboon warbixin ku saabsan Title I barnaamijyada Qaybta B warbixintaas oo ay ku jiri doonto sifooyinka iyo sharaxaada manhajka iskuulka, foomamka imtixaanada waxbarashada ee la adeegsado si loo cabiro horumarka ardayga, iyo heerarka ardaydu ka joogto waxyaabihii laga filayey.
6. Haddii waalidku codsado, waxaa la siin doonaa fursado loogu talagalay kulamo joogto ah oo loogu talagalay in waalidiintu ku dhiibtaan talooyinka sidoo kalena kaga qaybgalaan, haddii ay munaasab tahay go'aamada ku saabsan waxbarashada ilmahooda. Iskuulku wuxuu uga jawaabi doonaa wax kasta oo la soo jeediyo sida ugu dhakhsaha badan.
7. Waalid walba waxaa la siin doonaa warbixin gaara oo ku saabsan kaalinta ilmihiiis galay imtixaanka guud ee gobalka maadooyinka xisaabta, luqada fanka iyo akhriska.

Saxeexa Macallinka\_\_\_\_\_

Taariikhda\_\_\_\_\_

Saxeexa Waalidka/Masuulka\_\_\_\_\_

Taariikhda\_\_\_\_\_

Saxeexa Ardayga\_\_\_\_\_

Taariikhda\_\_\_\_\_



Bayaanka Ogeysiiska Helitaanka Dadweynaha

Si aad u codsatid in lagu fududeeyo, fadlanla xiriir Xarunta Shaqada Mujtamaca. (Turjubaanada dhegoolayaasha ama dadka dhegaha culus waa in la codsado afartan iyo sideed 48 saacadood ka hore dhacdada.) Gudoonka Waxbarashada Degmada Nahvillle cidna kuma sameeyo takoor ku salaysan isir, caqiido, asalkaagii hore, jinsi, naafo xaas, doob ama da'a.

**Maamulaha Dugsiga Hoose ee McGavock Marwo Smith – 615-885-8912**